

State of Minnesota/ Gobolka Minnesota

District Court/ Maxkaamadda Degmada

County of/ Degaanka: _____ Court File Number /Lambarka Galka Maxkamadda: _____
Judicial District / Garsoorka Degmada: _____ Case Type/ Nooca Kiiska: _____

State of Minnesota / Gobolka Minnesota

Plaintiff / Dacwo Oogaha

vs/vs

Defendant / Eddeeysanaha

First Appearance Statement of Rights / Xuquuqda Eeddeeysanaha Maalinta Koowaad ee Maxkamadda

I understand that / Waxaan fahamsanahay:

1. I am charged with committing the offense(s) described in the complaint or citation (ticket).

In la igu soo eedeeyey sameynta danbi(yada) ku xusan qoraalka dacwada la igu soo ooqey ama tigidhka eeddeeynta inaan sharciga jebiyey.

2. The maximum sentence for each felony offense is as specified in the complaint or citation (ticket). If I am charged with a gross misdemeanor, the maximum possible sentence is a \$3,000 fine and applicable surcharges, 1 year in jail, or both. If I am charged with a misdemeanor, the maximum possible sentence is a \$1,000 fine and applicable surcharges, 90 days in jail, or both. If I am charged with a petty misdemeanor, the maximum possible sentence is a \$300 fine and applicable surcharges.

Xukunka ugu badan ee danbiyada waaweeyn wuxuu ku cad yahay qoraalka dacwada ama tigidhka, haddii la igu haysto danbi heer dhexe ah, xukunka suuurta galka ah ee ugu badan waa ganaax ah \$3,000 iyo kharshaad kale, 1 sano oo xabsi ah, ama labadaba, haddii la igu haysto danbi heer hoose ah xukunka suuurta galka ah ee ugu badan waa ganaax ah \$1,000 iyo kharshaad kale, 90 maalmood oo xabsi ah, ama labadaba. Haddii la igu dacweeyo inaan sameeyey xad gudub, xukunka suurta galka ah ee ugu badan waa ganaax ah \$300 iyo kharshaadka kale ee la xiriira.

3. I have the right to be represented by an attorney at all times, including during police line-up or police questioning, and to ask for an attorney at any stage of the court proceedings.

Waxaan xaq u leeyahay in uu qof qareen ah i matalo mar kasta, sida marka boolisku ila kulmayaan ama ay wareysi iga qaadayaan, iyo in aan qareen codsan karo mar kasta inta ay ii socoto hawsha maxkamaddu.

- For all misdemeanor, gross misdemeanor, and felony offenses, an attorney will be appointed to represent me if I cannot afford to pay for an attorney. The public defender application is available at pdapplication.courts.state.mn.us, or scan the QR code:

Dhammaan danbiyada heerka hoose danbiyada heerka dhexe, iyo danbiyada waaweyn, qareen ayaa la ii qabanayaa in uu i matalo haddii aanan anigu dhaqaale ahaan awoodin in aan iska bixiyo lacagta qareenka. Foomka laga buuxsado codsiga Qareenka difaaca dadweynaha waxaa laga heli karaa pdapplication.courts.state.mn.us, ama ku qabo kamarada telefankaaga shabadda (QR code) ee hoos ku taal:



I understand a public defender cannot be appointed if I am charged only with a petty misdemeanor and I must hire my own attorney or represent myself.

Waxaan fahamsanahay in aan qareen dadweyne la ii qaban karin haddii la ii haysto fal xadgudub ah laakiin aan dembi aheyn, oo aniguna aan mar walba keensan karo qareen, ama aan anigu isu hadli karo qareen la'aan.

- I do not have to say anything about the facts or circumstances of the case. I do not have to answer questions from the police or anyone else about the case.

Khasab iguma aha in aan ka hadlo xaqiyooyinka ama xaaladaha kiiska. Khasab iguma aha in aan ka jawaabo su'alaha ku saabsan kiiska ee ay i weydiyaan booliska ama dadka kale.

- Anything I say may be used against me in this or other court proceedings.

Wax kasta oo aan iraahdo waxaa loo isticmaali karaa si lid ku ah kiiskeeygaan ama kiisas kale.

- I can speak to an attorney before my next court appearance, and I will be given enough time before my next court date to hire and speak with an attorney.

Ballanteeyda soo socota ee maxkamadda inta ka horreeysa waxaan lasiii hadli karaa qareen, haddii aan codsadana inta ka horreeysa ballanta soo socota ee maxkamadda waxaa la i siinayaa waqtii igu filan ee aan ku qabsado qareen i difaaca.

- I have a right/ *Waxaan xaq u leeyahay:*

- For misdemeanor, gross misdemeanor, or felony offenses: to a trial before a jury, or a judge without a jury, in which I am presumed innocent until the State proves my guilt beyond a reasonable doubt; OR

Danbiyada fudud, danbiyada heerka dhexe, ama danbiyada waaweyn: in la i saaro maxkamad ay ka gar naqayaan Guddi Xeerbeegti ah oo laga soo xulay dadweynaha degaanka, ama maxkamad uu ka gar naqayo Garsooraha oo keli ah, inta ay dacwadeeydu

ka socoto maxkamadda waxaan xaq u leeyahay in la iila dhaqmo sida qof aan danbi gelin oo kale ilaa iyo inta Gobolku si aanu ku jirin shaki aqli gal ah maxkamadda ugu cadddeeynayo inaan galay danbiga; AMA

For petty misdemeanor offenses: to a trial before a judge in which I am presumed innocent until the State proves my guilt beyond a reasonable doubt.

Xad gudubyada: in aan hor tago garsooraha maxkamadda, iyadoo intey dacwadu socoto la iila dhaqmayo sidii aan ahay qof aan danbi gelin ilaa iyo inta Gobolku si aanu ku jirin shaki aqli gal ah maxkamadda ugu cadddeeynayo inaan galay xad gudubka.

- b. To remain silent at all times, including at trial. To testify, if I wish, but anything I say can be used against me in court.

In aan mar kasta iska aamusnaan karo, xataa marka lagu jiro garnaqsiga. In haddii aan rabana hadli karo oo aan ka marag furi karo kiiskeeyga maxkamadda horteeda, laakiin si lid igu ah baa loo isticmaali karaa wixii aan maxkamadda horteeda ka sheego.

- c. To confront and cross-examine all witnesses.

Inaan ka hor imaado oo su'aalo weydiyo dadka igu markhaati furaya oo dhan.

- d. To subpoena witnesses on my own behalf.

In aan maxkamadda ugu yeerto markhaatiyada aan anigu wato.

- e. To a written complaint if I am charged by citation (ticket).

Waxaan xaq u leeyahay dacwo qoraal ah haddii la ii siiyey tigidh.

9. I can tell the judge at my court hearing what I think should be done about bail or my release from custody.

Waxaan inta la dhegeeysanayo dacwada garsooraha u sheegi karaa waxa aan u maleynayo in ay tahay in laga sameeyo arrimaha ku saabsan dammaanadqaadka iyo in la iga siiddeeyn karo xaringga.

10. I can be charged with a crime if I fail to appear for court when I am told or notified of a court date, and the punishment for failure to appear can include a fine, jail, or both.

Waxaa la igu soo oogi karaa dambi haddii aan maxkamadda imaan waayo marka la iiga yeero ama la i sii ogeysiyo taariikhda iyo saacadda ballanta. Ciqaabta marka ballanta maxkamadda la imaan waayana waxay noqon kartaa ganaax, xarig ama labadaba.

If I fail to appear for court and I am charged with a petty misdemeanor, or a misdemeanor that is certified as a petty misdemeanor, a guilty plea and conviction may be entered and any fine and surcharges imposed may be referred to collections.

Haddii aan imaan waayo ballanta maxkamadda aniga oo la igu soo dacweeyey inaan sharciga ku xad gudbey, ama la igu soo oogey dembi fudud laakiin sharci ahaan darajadiisa

hoos loo sii dhigay oo loo beddeley heer xad gudub ah, waxaa diiwaanka la ii gelinayaa inaan qirtay oo la igu helay dacwadii la ii haystey, isla markaana ganaaxii iyo kharashkii la xiriirey oo dhan waxa loo diri karaa shirkadaha ka shaqeeysta soo uruurinta lacagaha dadka lagu leeyahay.

In any case, a warrant may be issued for my arrest if I fail to appear for court.

Sideey noqotaba, haddii aan imaan waayo ballanta maxkamadda garsooruhu wuxuu soo saari karaa qoraal uu ku amarayo in la i soo xiro.

11. I understand that if I am not a citizen of the United States, a guilty plea or finding may result in deportation, exclusion from admission to the United States, or denial of naturalization as a United States citizen.

Waxaan fahamsanahay in haddii aan weli qaadan dhalashada Mareykanka oo aan qirto ama la igu helo dembi in dalka la iga musaafirin karo, ama la ii diidi karo inaan dalka dib ugu soo laabto, ama la ii diidi karo inaan qaato dhalashada Mareeykanka.

Notify the court if your address, email, or phone number changes.

Maxkamadda soo ogeeysii haddaad beddeshey lambarka telefankaaga ama aad beddeshey ciinwaanka gurigaaga.

You can opt in to receive an e-mail or text to remind you of upcoming hearing dates!

Waxaad isku qori kartaa in lagu soo diro e-mail ama farriimaha qoraalka ah ee teleefanka si laguu soo xasuusiyo taariikhaha ballanta dhageysiga kiiisaskaaga maxkamadda ee soo socda!



To receive an eReminder for future court dates via e-mail or text, visit
www.mncourts.gov/Hearing-eReminders.aspx or scan the QR code to enroll.

Si aad u hesho email-ka iyo farriinta telefanka lagugu xusuusinayo ballantaada maxkamadda booqo www.mncourts.gov/Hearing-eReminders.aspx ama si aad isugu qorto ku qabo kamarada telefankaaga shabadda (QR code).